# FAAFINTA RASMIGA

# الجريدة الرسمية

**DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA**

لولاية أرض بونت الصومال

Sannadka 2 aad Garoowe, 29 September 2000 Lam. 9

FAAFINTA BILWALBA KA SOO BAXDA جريدة الشهرية

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee **Madaxtooyada** Dawlad Goboleedka Puntaland

---

Qiimaha : waa Sh.So- 10.000 lambar walba.**Rukunka** Sannadkii waa Sh.So.-170.000 dalaka gudihiisa.dibaddana waa Sh.So.500.000-**Rukunka** la waydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilowdaa 1da janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So. 3.000 Rukunka iyo Qoritaanka waxaa la waydiistaa Qaybta Maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda.

---


## TUSMADA

### Qaybta Koowaad

### Sharci


- **Sharci Lam.** 12 ee 27/09/2000. (Garoowe) kuna saabsan Qaanuunka Isgaarsiinta Dawladda Puntland........................................................... Bogga. 80 – 83
- **Sharci Lam.** 13 ee 27/09/2000, (Garoowe) kuna saabsab Qaanuunka Madbacada iyo Qoraalada ........................................................................ Bogga . 84 – 88
- **Sharci Lam.** 14 ee 27/09/2000, (Garoowe) kuna saabsan khidmada laga qaadayo shatiyada wax lagu dhoofiyo, lagu soo dejiyo iyo ganacsiga guud................Bogga. 89 –92.
- **Sharci lam.** 15 ee 27/09/2000, (Garoowe) kuna saabsan hanti dhowrka Guud ............ ..........................................................................................Bogga 93 – 98.
- **Sharci Lam.** 16 ee 27/09/2000, (Garoowe) kuna saabsan Qaanuunka dhul Bixinta........ .......................................................................................Bogga. 99 -105


### Qaybta Labaad

### Xeer

Waxba Maleh

### Qayta Saddexaad

Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis IWM

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**

*XAFIISKA MADAXWEYNAHA*

**PUNTLAND STATE OF**
**SOMALIA**

*OFFICE OF THE PRESIDENT*

Sharci Lam 16 ee **27/09/2000**
kuna saabsan qaanuunka dhul bixinta & dhismaha.

Garoowe **29 September**

**MADAXWEYNAHA DAWLADDA,**

**MARKUU ARKAY** Axdiga Dawladda Puntland.

**MARKUU TIXGELIYEY** Ansixinta Golaha Wakiillada ee ku cad warqadda summaddeedu tahay GW/60/2000, taariikhdeeduna tahay Garoowe 04/09/2000.

**WUXUU SOO SAARAY: -**

Sharcigan soo socda:

**Qodobka 1aad**

Qaanuunka dhul bixinta iyo dhismaha Dawladda Puntland ee qaanuunkan ku lifaaqan waa la ansixiyey.

**Qodobka 2aad**

Saddex nuqul oo qaanuunkan ka mid ah ee Madaxweynuhu saxiixay iyo lifaaqiisa waxaa loo qaadanayaa asal (Original). waxaana lagu kala kaydinayaa Xafiiska Garyaqaanka Guud hal nuqul, Xafiiska Xoghaynta Madaxtooyada hal nuqul, Xafiiska Xoghayaha Golaha Wakiillada hal nuqul.

**Qodobka 3aad**

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxiixo Madaxweynaha Dawladda, waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Dawladda, wuxuuna sharcigani ka mid noqonayaa sharciyada dalka, qofkastana waxaa ku waajib ah inuu dhawro kuna dhaqmo.

Cabdullaahi Yuusuf Axmed
Madaxweynaha Dawladda

# DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND
# XAFIISKA MADAXWEYNAHA

Sharci Lr.____________ee 3/4/99Sharciga Dhul bixinta iyo dhismaha,

Madaxweynaha DG Puntland

| | |
|---|---|
| **Markuu arkay** | Qodobka 32 ee axdiga DG Puntland |
| **Markuu arkay** | Sharci Lr 14 ee May 1961 kuna saabsanaa dhul bixinta |
| **Markuu arkay** | Sharci Lr 3 ee Murch 1964 kuna saabsan dhulka |
| **Markuu arkay** | Baahida loo qabo dib u hagaajinta qaab dhismedka Magalooyinka Puntland |
| **Isagoo tixgeliyay** | Soojeedinta Wasiirka WHG iyo Gaadiidka |

Wuxuu Soo Saaray Sharcigan Soo Socda.

Qodobka 1 aad

1.1. Waxaa la xeeriyay Xafiiska dhul bixinta ee Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Gaadiidka,oo qaabilsan bixinta rasmiga ah ee dhul iyo ruqsadsiinta dhul dhisidda.
1.2. Dhulka Puntland [Awoodda ilaah ka sakow] waxaa iska leh Dawladda, dhul lama yeelan karo rasmi ahaan, haddii aan mulkiyad laga haysan Xukuumadda Puntland.
1.3. Gabal dhul, oo ka mid ah qayb magaalo oo ay kabaxday Naqshad Guud, keliya ayaa loo samayn karaa mulkiyad rasmi ah ee lahaanshaha.
1.4. Muwaadin kasta wuxuu xaq uleeyahay mulkiyad dhul degaan, ganacsi iyo mashaariceed, haddii uu awood dhaqaale u leeyahay inuu dhulka ku fuliyo baahida uu u dalbaday.
1.5. Qofna ma codsankaro, mulkiyadna looguma samayn karo dhul haddii gabal dhul ah oo midka uu soo codsaday la ujeeddo ahi uga bannaan yahay isla Magaaladaas.
1.6. Dhammaan dhismayashii Dawladda iyo dhulkii bannaanaa waa hanti Qaran, oo ka reeban ku xad gudub qaadasho cid gaar ahaaneed.
1.7. Dhul looma qaadan karo ka ganacsi, waxaana loo isticmaali karaa baahida loo bixiyay keliya.
1.8. Dhul cid gaar ahi lahaansho rasmi ah u haysato waxaa Dawladdu dan guud ula wareegi karkaa, haddii looga marmi waayo arrimaha caamka ah, dhul banaan ee lala wareegay waxaa lagu bedelayaa dhul banaan, dhul dhisan waxaa loo celinaya qiimihiisii.

## Qodobka 2 aad
## Mulkiyadda Lahaanshaha.

2.1. Mulkiyad lahaanshodhul waxay dhaqan gal tahay marka la bixiyo lacagta ka waajibtay dhul bixin ee sharacgani ku tilmaamayo.
2.2. Haddii mulkiyad lahaansho dhul si sharci ah loo bixiyo waxay ku buri kartaa si sharciga waafaqsan, lagumana xad gudbi karo.
2.3. Mulkiyad lahaansho dhul oo aanlaga bixin ama laga diiwaan gelin Xafiiska dhulka ee WHGG , looma aqoonsan doono in ay sharci tahay.
2.4. Mulkiyad lahaansho dhul horedamanyaale [demoniale]ugu jiray waa loo cusboonaysiin karaa, haddii aan dhulkaasi la waayin sharcigaan.
2.5. Mulkad lahaansho dhul iyo/ama dhisme mar hore si sharci ah loo bixiyay, waxaa loo samaynayaa mis cusub, haddii aan arrintaasi wax u dhimayn qodob ka mid ah

J) Degmooyinka darajada C waxay ka kooban yihiin.

1. Iskushuban.
2. Laasqoray.
3. Dangoroyo.
4. Qandala.
5. Dhahar.
6. Jiriiban.
7. Xuddun.
8. Taleex.
9. Caynabo.
10. Ufayn.
11. Baar-gaal.

## Qodobka 5 aad
## Qiimaha dhul bixinta.

5.1. Qiimaha dhul bxinta Degmooyinka derejadoodu tahay A waxay u kalabaxdaa saddex derejo oo kala ah sidaan.

B) Dhulka ku yaalla Zone A waxaa laga qaadayaa halkii $1m^2$ lacag dhan 500 s.sh
T) Dhulka ku yaalla Zone B waxaa laga qaadayaa halkii $1m^2$ lacag dhan 450 s.sh.
J) Dhulka ku yaalla Zone C waxaa laga qaadayaa halkii $1m^2$ lacag dhan 400 s.sh.

5.2. Qiimaha dhulka degmooyinka darajadoodu tahay B waxay u kala baxayaan Sadex darajo oo kala ah:-
b) Dhulka ku yaala Zone A waxaa laga qaadaya $1m^2$ lacag dhan So. Sh 450
t) Dhulka ku yaala Zone B waxaa laga qaadaya $1m^2$ lacag dhan So. Sh 400
j) Dhulka ku yaala Zone C waxaa laga qaadaya $1m^2$ lacag dhan So. Sh 350

5.3. Qiimaha dhulka darajadoodu tahay C waxaa lookala saarayaa sadex derajo oo kala ah.
B) Dhulka ku yaalla Zone A waxaa laga qaadayaa $1m^2$ lacag dhan So.Sh. 400.
T) Dhulka ku yaalla Zone B waxaa laga qaadayaa $1m^2$ lacag dhan So. Sh.350.
J) Dhulka ku yaalla Zone C waxaa laga qaadayaa $1m^2$ lacag dhan So.Sh. 300.

## Qoddobka 6 aad
## Cusboonaysiin iyo Diiwaangelin.

6.1. Qof kasta oo haysta mulkiyad lahaansho dhul (mid dhisaniyo mid aandhisnayn) waa loo cusboonaysiinayaa lana diiwaangelinayaa.
6.2. Dhammaan mulkiyadaha hore si sharci ah loogu bixiyay, waa in xafiiska waaxda dhismaha iyo dhulka lagaga diiwaangeliyaa sadex bilood gudahood laga bilaabo maalintasharcigaan lagu soo saaro Faafinta rasmiga ah ee DG Puntland.
6.3. Diiwaan gelinta ku tilmaaman farqadda 6.1. waxaa loo tixgelinayaa marka rasmi ahaan loo dajiyo Naqshadda Guud ee Magaalooyinka.

2.6. Dhulkasta oo laga sameeyo dhisme Magaalo, oo aan loo marin sida sharcagani tilmaamayo waa ku meel gaar lagumana dacwoon karo.

## Qodobka 3 aad
## Habka dhul bixinta

3.1. Dhul waxaa lagu bixinayaa heerka darajada u kala leeyahay, ayadoo lawaafajinayo naqshadda guud ee magaalada.

3.2. Mulkiyad lahaansho dhul waxaa la bixinayaa marka la helo laguna qoro, codsi dhul oo uu soo gudbiyay qof, shirkad, ama cid kale si sharciga waafaqsan.

3.3. cid kasta oo dhul lasiiyay waxaa shardi ah in lagu dhiso lix bilood gudahood laga bilaabo marka la siiyay dhulkaas, lahaanshaha waxaa loo cusbaynaysiin karaa Afar goor oo min lix bilood ah.

3.4. mulkiyad lahaansho dhul waxaa la cusboonaysiin karaa marka la helo codsi sababaysan ee lagu qanci karo, loona soo qorto waaxda dhismaha iyo dhulka ee WHG iyo Gaadiidka.

3.5. cid kasta oo dhul la siiyay ku dhisan weyda sida ku cad Qodobka 3 aad, Faqraddiisa 3aad, wuxuu luminayaa oo dhaqan beelaysa mulkiyaddiisa, mana soo codsan karo dhul cusub muddo labo sano ah, laga bilaabo maalinta mulkiyadda hore ku dhaqankeeda la tirtiray.

## Qodobka 4 aad
## Heerarka Derejooyinka Dhulka

4.1. Marka sharcigaan lagahadlayo Degmooyinka DG Puntland, waxaa loo qaybinayaa 3 derajo oo kala ah A,B iyo C, kuwaas oo usii kala baxaya saddex qaybood.

B) Degmooyinka derajada A waxay ka kooban yihiin sidaan:-

1. Garoowe.
2. Boosaaso.
3. Gaalkacayo.
4. Laascaano.
5. Ceerigaabo.

T) Degmooyinka darajada B waxay ka kooban yihiin:-

1. Qardho.
2. Caluula.
3. Bandarbayla.
4. Burtinle.
5. Galdogob.
6. Buuhoodle.
7. Badhan.
8. Eyl.

## Qodobka 7 aad
## Qiimaha Cusboonaysiinta iyo Diiwaangelinta.

7.1. Mulkiilaha leh lahaansho dhul damaanyaale ama Minicipale waxaa loo samaynayaa diiwaangelin.

B) Cuboonaysiin dhuldamaanyaale ah ee ku yaalla degmooyinka darajadoodu tahay A.

| | | |
|---|---|---|
| ♦ Dhulka ku yaalla Zone A1 | So.Sh. | 700 $m^2$ |
| ♦ Dhulka ku yaalla Zone A2 | So.Sh. | 600 $m^2$ |
| ♦ Dhulka ku yaalla Zone B | So.Sh. | 500 $m^2$ |
| ♦ Dhulka ku yaalla Zone C | So.Sh. | 400 $m^2$ |

T) Cusboonaysiinta dhul damaanyaale ah ee ku yaalla degmooyinka derajadoodu tahay B.

| | | |
|---|---|---|
| ♦ Dhulka ku yaalla Zone A | So.Sh. | 500 $m^2$ |
| ♦ Dhulka ku yaalla Zone B | So.Sh. | 400 $m^2$ |
| ♦ Dhulka ku yaalla Zone C | So.Sh. | 300 $m^2$ |

J) Cusboonaysiinta dhul damaanyaale ah ee ku yaalla degmooyinka derajadoodu tahay C.

| | | |
|---|---|---|
| ♦ Dhulka ku yaalla Zone A | So.Sh. | 400 $m^2$ |
| ♦ Dhulka ku yaalla Zone B | So.Sh. | 300 $m^2$ |
| ♦ Dhulka ku yaalla Zone C | So.Sh. | 250 $m^2$ |

X) Diiwaangelinta Mulkiyadda damaanyaale ah ee ku yaalla degmooyinka derajadoodu tahay A.

| | | |
|---|---|---|
| ♦ Dhulka ku yaalla Zone A | So.Sh. | 600 $m^2$ |
| ♦ Dhulka ku yaalla Zone B | So.Sh. | 500 $m^2$ |
| ♦ Dhulka ku yaalla Zone C | So.Sh. | 400 $m^2$ |

KH) Diiwaangelinta mulkiyadda damaanyaale ee ku yaalla degmooyinka derajada B iyo C.

| | | |
|---|---|---|
| ♦ Dhulka ku yaalla Zone A | So.Sh. | 500 $m^2$ |
| ♦ Dhulka ku yaalla Zone B | So.Sh. | 400 $m^2$ |
| ♦ Dhulka ku yaalla Zone C | So.Sh. | 300 $m^2$ |

7.2. Dhul ama dhisme kasta oo si sharci darro ah loo degay ama loo dhistay waxaa lagu dhaqayaa naqshadda Guud ee Magaalooyinka.

## Qodobka 8aad
## Ruqsad siinta dhismaha.

8.1. Ruqsadda dhisidda dhul waxaa bixinaya xafiiska dhulka keliya ee Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Gaadiidka.

## Qodobka 9 aad

9.1. Khidmadda ruqsadsiinta dhisme waa sida soo socota (Deg. A)

- Dhulka ku yaalla Zone A1 So.Sh. 150.000
- Dhulka ku yaalla Zone A2 So.Sh. 125.000
- Dhulka ku yaalla Zone B So.Sh. 100.000
- Dhulka ku yaalla Zone C So.Sh. 80.000

9.2. Dhulka ku yaalla degmooyinka derajadoodu tahay B

- Dhulka ku yaalla Zone A So.Sh. 80.000
- Dhulka ku yaalla Zone B So.Sh. 70.000
- Dhulka ku yaalla Zone C So.Sh. 60.000

9.3. Dhulka ku yaalla degmooyinka derajadoodu tahay C.

- Dhulka ku yaalla Zone A So.Sh. 50.000
- Dhulka ku yaalla Zone B So.Sh. 45.000
- Dhulka ku yaalla Zone C So.Sh. 35.000

9.4. Khidmadaha ku soo hoyda qodaba 5,6,7 iyo 11 aad ee sharcigaan waxaa laga siinayaa shaqaalaha waaxda dhulka iyo dhismaha dhiirigelin dhan boqolkiba 10 boqolkiiba marka ay bislaato.

## Qodobka 10 aad
## Naqshadda Guud.

10.1. Naqshadaynta Guud ee magaalooyinka dalka Puntland waxaa u xilsaaran Wasaaradda Hawalaha Guud iyo Gaadiidka.

10.2. Lama dhisi karo dhisme aan naqshaddiisa laga ogolaan lagana diiwaan gelin xafiiska naqshadaha ee W.H.G. iyo Gaadiidka.

10.3. Habka naqshadaynta maagaalooyinka ayaa la waafajinayaa dhul bixinta oo noqonaysa degaan – degaan iyo xaafad xaafad,una qaybsan noqshad cabbir dhaban ah, sida 20x20 m2, 80x40m2, 100x90, 50x150, IMW.

10.4. Dhisme kasta waxaa si joogto ah ula soconaya una kantaroolaya injineero ka socda Wasaaradda H.G.G. si loo hubiyo dhaqan gelinta naqshadda guud ee magaalooyinka.

10.5. Fulinta dhisme kasta (mid cusub iyo Mid dib u dhisid) oo aan naqshaddiisa iyo ruqsadda dhismihiisa laga ogolaan xafisyada sharcigani tilmaamayo ee WHG iyo Gaadiidka waa dembi.

## Qodobka 11 aad
## Qiimaha Naqshadaynta iyo Diiwaangelinta naqshadda.

11.1. Qiimaha naqshad samaynta iyo diiwaangelinta naqshadaha dhulku waa sida ku cad shaxda soo socota.

| Derajo Degmo | Heerka dhulka | Qiimaha Naqshad Samaynta | Qiimaha D/gelinta Naqshadda |
|---|---|---|---|
| Degmooyinka A | Zone A<br>Zone B<br>Zone C | So.Sh. 500 M2<br>So.Sh. 450 M2<br>So.Sh. 400 M2 | So.Sh. 150 M2<br>So.Sh. 125 M2<br>So.Sh. 100 M2 |
| Degmooyinka B | Zone A<br>Zone B<br>Zone C | So.Sh. 400 M2<br>So.Sh. 350 M2<br>So.Sh. 300 M2 | So.Sh. 100 M2<br>So.Sh 80 M2<br>So.Sh. 60 M2 |
| Degmooyinka C | Zone A<br>Zone B<br>Zone C | So.Sh. 300 M2<br>So.Sh 250 M2<br>So.Sh. 200 m2 | So.Sh. 60 m2<br>So.Sh. 50 m2<br>So.sh. 40 m2 |

## Qodobka 12 aad
## Kala xadaynta Dhulka

12.1. Dhulka waxaa loo kala saarayaa afar qaybood oo kala ah Dhul daaqsimeed, Dhul beereed, Dhul Xeebeed iyo Dhul deegaan magaalo.

12.2. Si loo ilaaliyo dhul daaqsimeedka loogana hor tago nabaad guurka, Magaalooyin, Barkado, Ceelal, iyo waro cusub meel hor leh lagamana samayn karo haddii aan ruqsad laga helin Wasaaradda HGG.

12.3. Dhul daaqsimeedka, Beeraha iyo seerayaasha waxaa lagu maamuli xeer gaar ah.

## Qodobka 13 aad
## Laalid Sharci

Xeer kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin Qaanuunkaan waa la tirtiray.

## Qodobka 14 aad
## Dhaqan gal

Qaanuun wuxuu dhaqan gelayaa marka Golaha Wakiiladu ansixiyo Madaxweynaha Dawlad Goboleedka Puntland Saxiixo, waxaana lagu soo saari faafinta rasmiga ah ee DG Puntland.

C/laahi Yuusuf Axmed
Madaxweynaha Dawlad Goboleedka Puntland

Garoowe 30/3/99